



Karti ku salaysan khibrad

Adeeg bixiyayaasha iyo shaqaalaha ka shaqeynaya goob liisan leh oo daryeelka caruurta ah iyo barnaamijyada Early Learning Programs (tacliinta xilliga hore) waxay ku buuxin karaan doorkooda aqoon iyo khibrad wada socda.

Si aad u dooratid qodobkani, bixiyayaashu waxay galayaan akoonkooda MERIT waxayna cusboonaysiinayaan shaashadooda.

Marka khibrada laga doorto MERIT dhexdeeda, xaalada shaashada ee doorka shaqadu waxay isku badali doontaa akhtar shuruuduhuna way buuxsami doonaan.



Sida loo doorto dookhani MERIT dhexdiisa.

Go'aami haddii dariiqani uu yahay dookha kuugu fiican adiga. Markaad doorato dookhan, waxaad qiranaysaa kuwani soo socda:

- Tani waxay buuxinaysaa shuruudahaaga Liisan samaysashada.
- Tani ma tagi doonta dhibcaha dhinacaaga Early Achievers (guulaystayaasha xilliga hore) ee waxbarashada.
- Tani may buuxin aqoonta shaqaalaha ee ECEAP.
- Dookhani ma dhisayo fursado waxbarasho oo mustaqbalka ah.
- Waad dhamaysatay dhamaan shuruudihii tababarada ee todobadii sano ee la soo dhaafay.



Cusboonaysii shaashadaada MERIT

1. Ka gal MERIT halkani merit.dcyf.wagov.
2. Guji halka istaytas baarka ee "Job Role Education (Doorka shaqada ee waxbarashada)" ee shaashadaada MERIT.
3. Guji batanka "Click here (Halkan guji)" Sanduuq yar ayaa soo muuqan doona.
4. Isticmaal liiska kala baxaya si aad uga doorato "I want to use my experience and training (Waxaan doonayaa inaan isticmaalo khibradayda iyo tababarkayga)."
 - Ogaysiis: Dookhani wuxu kaliya muuqan doonaa haddii aad ku sugan tahay door ku haboon oo aad leedahay khibradii shaqo ee loo baahnaa bisha Aug. 1, 2026.
5. Guji "Save (Xafid)"
6. Istaytas baarka Doorakaaga shaqada ee waxbarashadu wuxu hadda noqon doonaa akhtar wuxuuna soo bandhigi doonaa shuruudihii aad buuxisay.

Qodobka doorashada khibradu diyaar ma aha si loo buuxiyo shuruudaha:

- Early Childhood Assistant Program (Barnaamijka caawimada caruurta ee xilliga hore) (ECEAP)
- Dhibcaha horumarinta aqoonta Barayaasha Horea



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



Ku haboonaanta

1. Shaqada diyaarka ah ee door shaqo oo markaa kugu haboon waxa lagu kaydinayaa MERIT dhexdiisa (<https://apps.dcyf.wa.gov/MERIT/Home/Welcome?ReturnUrl=%2Fmerit%2F>):
 - Guriga qoyska liisanka haysta
 - Macalinka Hogaanka Guriga Qoyska
 - Kaaliyaha Macalinka Guriga Qoyska
 - Macalinka Hogaanka Xarunta
 - Kaaliyaha Macalinka ee Xarunta
2. Isugaynta todoba sano oo khibrad shaqo ah oo aad kaga soo shaqaysay goob liisan leh waa inay kuugu buuxdo bisha Aug. 1, 2026.
3. Waa inuu buuxiyay ilaaliyay waafaqsanyahayna (dhamaan todobada sanoba) shuruudaha soo socda ee tababarka (WAC 0105: <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0105>, 0106: <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0106>, and 0107: <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0107>):
 - Dhamaan tababarada iyo caymiska caafimaadka ee la cusboonaysiin karo:
 - Xanuunada dhiiga raaca
 - CPR
 - Gargaarka deg-dega ah
 - Dadka cuntada ka shaqeeya
 - Hurdo Caafimaad Leh
 - Aas-aasiyaadka daryeelka ciyaalka ama wax u dhigma oo DCYF ay ansixisay – arag daabacaadaha *Dhamaystirka aas-aasiyaadka daryeelka caruurta* (EPS_0035) waxaad ka heli kartaa halkani www.dcyf.wa.gov/publications-library/EPS_0035



FAQs

Maxaan tani ugu arki waayay dookh ahaan si aan uga doorto shaashadayda MERIT?

Dookhani wuxu kaliya ka muuqan doonaa shaashadaada haddii aad ka shaqaynaysid door ku haboon oo aad leedahay khibradii shaqo ee loo baahnaa bisha Aug. 1, 2026.

Fadlan hubi kuwani soo socda:

- Waxaa haysataa shaqaalaysiin diyaar ah oo door kugu haboon ah taasi oo ku kaydsan xogta shaqaalaysiinta ee MERIT-kaaga.
- Xogtaada shaqaalaysiinta ee kayda MERIT-kaagu waa sax waxaana ku jira dhamaan taarikhahaaga shaqaalaysiineed ee la hal maala.

Sidee ayaan u cusboonaysiin karaa xogta shaqaalaysiintayda ee MERIT dhexdiisa?

La xidhiidh kooxda taageerada MERIT adoo iimayl ugu diraya merit@dcyf.wa.gov ama ka wacaya 1-866-482-4325, dookha 5.